

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Sebtembar 2024 ayaa gaaray 151.39, marka la barbardhigo 151.06 bishii Agoosto 2024.

Isbedel bileedka, Sebtembar 2024, marka la barbar dhigo Agoosto 2024, ayaa sare u kacay 0.22 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa **Isgaarsiinta** (26.23 boqolkiiba) iyo **Maqaayadaha iyo Hoteelada** (6.81 boqolkiiba). Sare u kaca **isgaarsiinta** ayaa inta badan ka yimid qiimaha Teefoonada & Agabka Telefax (+30.27 boqolkiiba). Sare u kaca **Maqaayadaha iyo Hoteelada** ayaa inta badan ka yimid qiimaha Adeegyada Hoyga (Hoteelada) 9.65 boqolkiiba.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Sebtembar 2023 iyo Sebtembar 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.33 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.93 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Agoosto 2023 iyo Agoosto 2024.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Sebtembar 2024 (Dec 2014 = 100)


| Tusaha Sicirka Badeecadaha, Sebtembar 2024 | |
|--|--------|
| Tusaha bishan (Sebtembar 2024) | 151.39 |
| Tusaha bishii hore (Agoosto 2023) | 151.06 |
| Tusaha sanadkii hore (Sebtembar 2023) | 143.73 |
| Isbedelka bilaha ah boqolkiiba % | 0.22% |
| Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba % | 5.33% |

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 billod

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Sebtembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Sebtembar 2024

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Sebtembar 2024

Heerka sicir-bararka bisha Sebtembar 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sebtembar 2023 iyo Sebtembar 2024.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.33 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sebtembar 2023 iyo Sebtembar 2024, marka labar bardhigo 5.93 boqolkiiba 12kii bilood, Agoosto 2023 iyo Agoosto 2024.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Sebtembar 2024 ayaa sameeyey sare u kacay dhan 0.22 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Sebtembar 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada** iyo **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay -1.11 boqolkiiba, bishii Sebtembar 2024 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -0.75 boqolkiiba bishii Agoosto 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay -0.15 boqolkiiba bishii Sebtembar 2024, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -1.01 boqolkiiba Agoosto 2024.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa hoos u dhac bille ah sameeyey -2.10 boqolkiiba ee bishii Sebtembar 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 3.37 boqolkiiba Sebtembar 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 6.89 boqolkiiba ee Agoosto 2024.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay.

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Sebtembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Sebtembar 2024(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkooda Kordhay (+):

- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 41.26 boqolkiiba bishii Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+58.77 boqolkiiba).
- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 31.64 boqolkiiba Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Macluumaadka oo u gaaray (+39.12 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 23.30 boqolkiiba Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+35.80 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+97.21 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 22.52 boqolkiiba Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka uu sito qofka oo qiimahoodu gaaray (+21.69 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 22.05 boqolkiiba bishii Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+26.72 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 19.60 boqolkiiba Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Agabka Guriga iyo Farsamadooda, Rogaga iyo Daboolka kale ee Dabaqa (+23.43 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 17.15 boqolkiiba Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu iibsado Gawaarida oo gaaray (+23.59 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 3.37 boqolkiiba bishii

War bixin bileedka bisha **Sebtembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia


Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha agabka dayactirka iyo hagaajinta guriga (+38.19 boqolkiiba).

- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 3.08 boqolkiiba, bishii Sebtembar 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Adeega Caafimaadka (+9.46 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Sebtembar 2024 (-)

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -12.21 boqolkiib bishii Sebtembar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (-26.15 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah -6.15 boqolkiiba bishii Sebtembar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dugsiga Sare kadib Waxbarasho Aan Jaamacad ahayn (-12.60 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee qeybaha kala duwan ee saameeya isbedelka bilaha ah ee TSB –da Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Sebtembar 2024 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Sebtembar 2024(+)

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac Bille ah 26.23 boqolkiiba bishii Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+30.27 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac Bille 6.81 boqolkiiba bishii Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Adeegyada hoyga (Hoteelada) (+9.65 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac Bille ah oo dhan 4.02 boqolkiiba Sebtembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Agabka Guriga iyo Farsamadooda, Rogaga iyo Daboolka kale ee Dabaqa (+6.46 boqolkiiba).

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay(-)

- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa hoos u dhac bille ah sameeyey -2.10 boqolkiiba ee bishii Sebtembar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada iyo Gaaska & shidaal kale (- 5.23 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Sebtembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Sebtembar 2024ee habka (COICOP)

| Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP | TSB Weight | Sebtembar 2023 TSB | Agoosto 2024 TSB | Sebtembar 2024 TSB | % Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore | % Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan |
|---|---------------|--------------------|------------------|--------------------|--------------------------------------|--|
| Dhamaan Qeybaha TSB-da | 100.00 | 143.73 | 151.06 | 151.39 | 0.22 | 5.33 |
| Cuntada & Cabitaanada | 46.04 | 142.75 | 144.14 | 142.54 | -1.11 | -0.15 |
| Tubaakadda | 1.25 | 167.33 | 146.90 | 146.90 | 0.00 | -12.21 |
| Dharka & Kabaha | 5.03 | 169.47 | 206.87 | 208.96 | 1.01 | 23.30 |
| Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale | 23.41 | 140.67 | 148.53 | 145.41 | -2.10 | 3.37 |
| Agabka Guryaha | 2.93 | 117.61 | 135.22 | 140.66 | 4.02 | 19.60 |
| Caafimaadka | 5.00 | 182.78 | 189.97 | 188.42 | -0.82 | 3.08 |
| Gaadiidka | 3.77 | 121.29 | 142.72 | 142.10 | -0.43 | 17.15 |
| Isgaarsiinta | 2.80 | 190.47 | 184.16 | 232.47 | 26.23 | 22.05 |
| Hawo Bedeleshada & Dhaqanka | 1.00 | 104.30 | 137.05 | 137.29 | 0.18 | 31.64 |
| Tacsiinta | 4.00 | 116.95 | 109.75 | 109.75 | 0.00 | -6.15 |
| Maqaayadaha & Hoteelada | 2.00 | 145.78 | 192.79 | 205.92 | 6.81 | 41.26 |
| Alaabaha Yaryar & Adeegyada | 2.77 | 120.52 | 147.14 | 147.66 | 0.35 | 22.52 |

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Oktoobar, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Nofeembar, 2024. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Sebtembar 2024 marka loo eego

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaato (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha Xogta: NBS

COICOPka

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Sebtembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia